

Diyaar ma u tahay imtixaanada gaari wadida cusub?

Imtixaanka Gaari-wadida Fiktooriya ee cusub ayaa la sameeyey si loo qiimeeyo dabeecada amaanka gaari-wadida laga filayo dareewalada baranaya kuwaas oo isu soo ururiyey 120 saacadood oo khibrad gaari wadid ah ee xaallada badan oo wadada la marayo.

Dadka soo qortay arjiga laysanka gaari wadida oo ku gudbay imtixaanka cusub waxay muujiyeen inay si amaana oo sharci ah u samayn karaan xarakaadka maalmeed ee wadida imtixaanka lagu qaaday.

Haddii aad awoodo inaad saxdo dhamaan qodobada liiska-hubinta soo socda, waxaad diyaar u tahay inaad isku daydo imtixaanka. Liiska-hubintu waa tuse ama hage keliya mana aha wax dhamaystiran. Khaladaadka wadida aan amaanka ahayn iyo dabeecadaha sharci darada ah waxaa loo eegaa si adag imtixaanka cusub, waana suurtagal bartaha aadka u diyaarsani inuu ku dhaco imtixaanka haddii aanu awoodin inuu muujiyo amaanka, iyo dabeecada wadida sharciga ah ee loo baahan yahay inta lagu jiro imtixaanka. Waxaa kaloo waajiba inaad xaqiijiso inaad sixi karto dhamaan hadafyada **Tusaha Bartayaasha VicRoads (Guide for Learners)**, taas oo qayb ka ah Kitka Bartaha (**Learner Kit**).

Diyaar ayaad u tahay imtixaanka cusub haddii:

- Aad haysato ugu yaraan 120 saacadood oo ah khibrada oo aad wadada ku samaysay wadid gaari la kormeerayo xaallada waditaan kala duwan, wado, iyo baabuurta wadada, kuwaas oo ay ku jiraan 10 saacadood oo habeen ah iyo khibrada ku socodka wadooyin qoyan xawaara sarreeya.
- Waxaad u samayn kartaa hawsha gaari wadida maalmeed si amaana dhowr wado oo kala nooc ah, kuwaas oo ay ku jiraan wadooyin mashquulla, kuwa layman badan, wadooyin xawaaruhu kala duwan yahay, iyo xaallado baabuurta maraysa kala duwan tahay.
- Waxaad u samayn kartaa hawsha gaari wadida maalmeed si amaana iyada oo aanu kaa caawinayn dareewalka ama amarbixiyuhu. Taasi, waxa weeye madaxbanaani ayaad u wadi kartaa waxaadna samayn kartaa go'aanada gaari wadida oo amaana.

Waxaad joogto u muujin kartaa dabeecada amaan ku wadida adiga oo ku wada xaallada waditaan oo kala duwan:

- Ka-warhayn – waxaad la socotaa dadka kale oo wadada isticmaalaya iyo xaallada wadada mar walba, adiga oo isticmaalaya madaxa iyo muraayadaha iyo weliba adiga oo gaarigaaga hortiisa eegaya lana socda gadaashaada adiga oo ku socda xawaare hoose
- Istimaalida ishaarada – waxaad ugu gudbisaa waxaad damacsan tahay isticmaalayaasha kale ee wadada adiga oo si sax ah u isticmaalaya ishaarooyinka
- Doorashada booska – waxaad doorataa barta amaanka ah markaad gelayso wadada baabuurta marayso
- Doorashada xawaaraha – waxaad had iyo jeer ku socotaa xadka xawaaraha adiga oo aan gaabinayn, taasi waa waxaad doorataa xawaare amaan, ku fiican kuna xiran xaalada wadada
- Bixinta fogaansho – mar kasta waa inaad banayso fogaansho u dhexeeya adiga iyo gaariga kaa horreeya
- Boos – dooro meesha ugu aaminsan oo aad ku socon karto, ku hay wado banaan, had iyo jeerna hayso laynkaaga
- Booska istaagida – waxaad si buuxda u istaajisaa gaarigaaga booska saxda ah markaad joogto calaamadaha istaagida, ishaarooyinka, iyo meelaha dadka lugaynayaan ka gooyaan
- Xakamayn – mar walba si amaana ayaad gaariga u xakamaysaa si amaana ayaadna u wadi kartaa

Waxaad u samayn kartaa ficilada soo socda si amaana xaallada gaari wadid oo kala gedisan:

- U leexashada midig iyo bidix isgoysyo badan oo kala duwan
- U bedelashada laynka dhinaciisa bidixeed ama midigeed
- Ka darsamida wada kale oo baabuuri marayso
- Gadaal u gelida baarkin is kula siman iyo leexashada saddexda dhibcood
- Gaari ku wadida wadooyin toosan ama leexsan xaallado kala duwan meel baabuuri marayso

Waxaad ku wadi kartaa xaallado kala duwan wado baabuuri marayso adiga oo aan qalad amaano xumo ah gelin:

- Ku dhicida wadada qarkeeda markaad gaariga wado
- Sigida baabuur kale ama kuwa wadada isticmaalaya
- Dhaafida xadka xawaaraha mar walba
- U keenida kuwa kale oo wadada isticmaalaya inay ka fogaadaan isku dhac adiga oo aan ishaaro shidanayn, iska eegayn ama wada siinayn
- Ku wadida calaamada Istaagida ama ishaaro daaran oo guduud ah
- Istaajinta gaariga boos aan aamin ahanayn
- Diyaar u noqoshada xaallada jira
- Ku guulaysashada eegida calaamadaha
- Xirida meelaha dadku ka gooyaan
- Ogolaanta in taayirku fuullo wadada qarkeeda ama u dhafo ama ka baxo baarkinka
- Ku guuldaraysashada si buuxda u istaagida, booska saxda ah, calaamada istaagida

Khalad aad u weyn oo amaanku waxay keeni kartaa in si degde ah lagaaga joojiyo imtixaanka laguuna diiwaangeliyo dhicid

Ogsoonow: liiskan hubintu maaha mid dhamaystiran. Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan Imtixaanka Wadida Cusub waa inaad eegtaa qoraalka la yiraahdo **What you need to know about your Drive Test** iyo websaytka GLS: www.gls.arrivealive.vic.gov.au

Koobiga **Guide for Learners** iyo **Guide for Supervising Drivers** waxaa lagala soo bixi karaa www.vicroads.vic.gov.au